TUSAALOOYINKA TAKOORKA LAGU SAMEEYO IIBINTA HANTI MAGUURTADA

Takoorka lagu sameeyo dadka guriyaha doonayo inay iibsadaan ayaa adag sida lagu ogaan karo. Hoosta waxaa lagu liis gareeyey tusaalooyin qaar oo muujin karo takoorka sharciga khilaafsan. Haddii aad dareemeyso in lagu takooray inta aad ku jirtay geedi socodka iibinta guri, la xiriir xaruunta guri siinta cadaaladda deegaankaada mise HUD.

- Dallaalka guri iibinta inuu diido inuu siiyo qoys Maraykan oo asal Afrikaan leh maclumaad ku saabsan guriyaha laga heli karo xaafad dadka cad ku badan yihiin oo ay iyaga weydiisteen. Intuu su'aashan ka jawaabi lahaa, dallaalka inuu soo jeediyo guriyo oo ku yaalo xaafada dadka laga tira badan yahay keli ay degaan.
- Dallaalka guri iibinta inuu ku hadlo haddalo ee midibka taabanaayo uu na kula hadlo dad guri iibsan rabo oo caddaan ah, sida hadaladan "Ilmahaada ayaa laga yaabo inay ficnaan dareemiin inay xaadiraan dugsiga heerka dhexe ee xaafadda ku yaalo."
- Dadka inuu iibsado doonaayo oo heer gaar oo la ilaalinaayo in si joogto ah loo tuso mise loo sheego guriyo oo aad uga hooseeyo mise aad uga sareeyo lacagta ay sheegeen inay ku dooneyaan.
- Guri iibiye inuu ku dhaho dallaalka iibinta inuu guriga ka iibinin dadka caddaanka ahayn mise qoysaska ciyaalka qabo.
- Dallaalka guri iibinta ayaa si joogto ah uga soo daahaa shirarka mise si joogto ah u qabanayn telefoonka, farriimaha, mise iimaylada dadka inuu iibsado doonaayo oo heer gaar oo la ilaalinaayo, laakin sidaa ku ahayn dadka kale oo heerarka la ilaalinaayo.
- Dallaalka guri iibinta inuu samayn waayo inuu gaarsiiyo qofka guriga iibinaayo soo jeedinta iibsashada ka timid qof guriga iibsan rabo, mise yeeli waayo inuu gaarsiiyo jawaabta qofka guriga iibinaayo uu na gaarsiiyo qofka guriga iibsan rabo.
- Urur mulkiileyaasha guriyaha inay diidaan inay ansixiyaan ka iibinta guri shakhsi laxaad la'aanta jirka mise maskaxda leh.
- Guri dhisaha inuu diido inuu guriyaha tuso dad doonaayo inay guriyaha iibsadaan mise diido inuu ka gorgortamo soo jeedin iib ay iyaga sameeyeen.
- Qoys ilmo qabaan in laga niyad jebiyo inay eegin guriyo xaafad qaar waayo dallaalka ayaa dareemaayo in dugsiyaalka xaafadda ku yaalaan inay aad u ficnayn.
- Urur guriyaha inay diidaan inay diiwaan geliyaan mulkiile saami cusub laxaad la'aanta dhaqdhaqaaqa uu leeyahay awgeed iyo/mise inay isticmaasho xayawaanka caawinta.
- Dallaalka guri iibinta inuu xadgudub galmadeed qof guri iibsan rabo mise adeegyada dallaalka guri uu bixinaayo macaamilka.
- Dallaalka guri iibinta inuu diido inuu hawl fududeyn u sameeyo macaamil laxaad la'aan leh, sida aqbalitaanka inuu isgaarsin uu ugu sameeyo turjubaan macaamil oo dhagool ah mise maqalka dhibaayo.

Sifo aad u hesho maclumaad dheeraad ah mise inaad furto kiis cabasho ku saabsan takoorka guri siinta, la xiriir wakaaladda guri siinta caddaalada deegaankaada mise booqo:

www.HUD.gov/fairhousing

High Plains Fair Housing Centre
405 Bruce Ave, #101
Grand Forks, ND 58201
Intake: 701-203-1077
www.highplainsfhc.org

High Plains Fair Housing Center
TENTH ANNIVERSARY

Qoraalka aasaaska u ahaa daabacaadkan waxaa si qayb ah loga taageeray deeq bixin ka timid U.S. Department of Housing and Urban Development (Waaxda Maraykan ee Guri Siinta iyo Dhismaha Magaalooyinka). NFHA keli ayaa masuul ka ah saxnaanta iyo turjubaanada ku jiro daabacaadkan.

U.S. DEPARTMENT OF HOUSING AND URBAN DEVELOPMENT

TAKOORKA LAGU SAMEEYO IIBINTA HANTI MAGUURTADA

High Plains Fair Housing Center

TAKOORKA GURI SIINTA SHARCIGA AYUU KHILAAFSAN YAHAY

Qaanuunka dawladda federaalka ee Guri Siinta Cadaaladda leh ayaa mamnuucadaa takoorka lagu sameeyo isdhaafsiyada guri siinta ku saabsan oo lagu salaynaayo midib qaraneed, midabka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda, naafonimada mise xaaladda qoyseed. Sharciyo badan ee gobolka iyo deegaankaba ayaa ku mamnuucaan takoorka guri siinta iyagoo ku salaynaayo kooxyo dheeraad oo la ilaalinaayo.

Qaanuunka Guri Siinta Cadaaladda leh ayaa sidoo kale soo galaan isdhaafsiyada guriyaha la xiriiro, kuwaasoo ka mid ah kireynta, iibinta, deyminta guriyaha, iyo qiimeynta guriyaha. Aqoon yahannada hanti maguurtada, ay ku jiraan dallaaliinta, wakiilada, qiimeyeyaalka, iyo dadka caymiska, waa qasab inay takoor ku dhex samaynin geedi socodka iibinta hanti maguurtada.
Dadka guriyaha iibinaayo iyo ururada mulkiileyaalka guriyaha ayaa sidoo kale laga mamnuucay inay takoor ku sameeyaan dadka doonaayo inay iibsadaan guriyaha iyagoo eegaayo ka mid ahaanshadooda koox ilaashan.

Takoorka guri siinta sharciga ayuu khilaafsan yahay. Hal waddo oo lagu joojin karo takoorka waa in warbixin laga sameeyo.

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

SU'AALAHA INTA BADAN SOO NOQNOQDO IYO JAWAABTOODA

Tallaabooyin noocee buu sharciga mamnuucayaa? Qaanuunka Guri Siinta Cadaaladda leh wuxuu mamnuucaa dabeecado badan oo kala duwan ee marxalad walbo ee iibinta mise iibsashada guri.

Tusaale, waa sharci darro inay dallaalinta guri iibinta sameeyaan:

- Inay diidaan inay liis gareeyaan mise bandhigaan guri iyagoo ku salaynaayo midib qaraneed, midabka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda, naafonimada mise xaaladda qoyseed ee qofka iibsan rabo mise iibiyaha.
- Inay diidaan inay soo bandhigaan guriyo xaafad qaar iyagoo ku salaynaayo midib qaraneed, midabka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda, naafonimada mise xaaladda qoyseed ee dadka halkaasi deggan mise qofka iibsan rabo.
- In loo duwo dadka iibsan rabo xaafado qaar iyagoo loo eegaayo midib qaraneed, midabka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda, naafonimada mise xaaladda qoyseed ee dadka halkaasi deggan.
- In la saaro shuruudo kala duwan dadka guriyaha iibsan rabo, taasoo ku jiri karto in la saaro shuruuda keenitaanka warqadda aqbalitaanka hore ee daynta mise heshiiska keli ahaanshada, shuruudahan na la saaro dadka qaar keli laakin kuwa kale laga codsanin, taasoo lagu salaynaayo midib qaraneed, midabka, diinta, asalka qaran, jinsiyadda, naafonimada mise xaaladda qoyseed.
- In la saaro kharash mise dhadhac oo ka badan dadka kale inta laga qaadaayo maadaamo uu shakhsiga ka mid yahay koox la ilaalinaayo.
- In la diido inuu guriga iib yahay gurigaasoo iib ah maadaamo uu shakhsiga ka mid yahay koox la ilaalinaayo.
- In la abaabulo, la daabaco, mise lasoo saaro ogeysiin, bayaan, mise ogeysiin suuq gelineed oo muujinayso in la jecleysanaayo, la xadidaayo, mise la takooraayo iyadoo lagu salaynaayo midib qaraneed, midabka, diinta, jinsiyadda, naafonimada, xaaladda qoyseed mise asalka qaran.

Waa sharci darro sidoo kale inuu qofka qiimeynta samaynaayo inuu:

- Qiimo hoose saaro guri iyadoo lagu salaynaayo ka mid ahaanshada dadka deggan xaafadaasi koox la ilaalinaayo.
- Inuu isticmaalo iib uu u barbar dhigaayo oon haboonayn oo qiimaha guriga hoos u dhigaayo maadaamo uu iibiyaha ka mid yahay koox la ilaalinaayo mise iyadoo lagu salaynaayo ka mid ahaanshada dadka deggan xaafadaasi koox la ilaalinaayo

Waa sharci darro inuu iibiyaha hanti maguurtada:

- Ammar ku siiyo dallaalka guri iibinta inuu guriga u bandhigo keli ah dad gaar ah keli ee midib qaraneed, midabka, diinta, jinsiyadda, naafonimada,xaaladda qoyseed mise asalka qaran.
- Inuu diido inuu iibiyo mise ka qayb galo ka wada hadal iibineed maadaamo uu qofka iibsanaayo suurto gal tahay inuu ka mid noqon karo koox la ilaalinaayo.
- Inuu ku dhex daro shuruuda xadiidaayo heshiidyada iibinta kuwaasoo ku takooraayo midib qaraneed, midabka, diinta, jinsiyadda, naafonimada, xaaladda qoyseed mise asalka qaran.

Waa maxay hagitaanka?

Hagitaanka waxaa soo galaan dabeecadaha sharciga khilaafsan oo isu dayo inay xadidaan dooqyada guriyaha iibka ah ee qofka doonaayo inuu guri iibsado maadaamo uu qofka iibsanaayo ka mid ahay koox la ilaalinaayo. Hagitaanka wuxuu sii joogteeyaa takoorka deegaaneed. Tusaalooyin ka mid ah hagitaankan ay sameeyaan aqoon yahannada iibinta guriyaha maxaa ka mid ah:

- Ka niyad jebinta qoys caddaan ah inay eegaan mise iibsadaan guri waayo guriga wuxuu ku yaalaa xaafad dad aan caddaan ahayn ay u badan yihiin.
- U bandhigga dadka caddaanka ahayn keli ah guriyaha ku dhex yaalo xaafadaha ay dadka caddaanka ahayn u badan yihiin, iyagoo guriyo kale laga heli karo xaafado kale ee soo galaayo waxyaabaha uu doonaayo macaamilka.
- Bunbuuninta xumaanta xaafad gaar taasoo lagu salaynaayo midibka qaraneed mise asalka qaraneed ee dadka deggan xaafadaasi. Tani waxaa ka mid ah in lagu tilmaamo dugsiyaalka deegaanka kuwo "xun" mise "liito". Waxaa sidoo kale ka mid ah bunbuuninta tirada dembiyaalka ka dhex dhacay xaafaddaasi taasoo loo sheegaayo dadka iibsanaayo ee caddaanka ah laakin dadka caddaanka ahayn loo sheegeynin.

Waa maxay falka culeyska lagu saaro qofka inuu iibiyo gurigiisa?

Falka culeyska lagu saaraayo qofka inuu iibiyo gurigiisa waa arrin ay mamnuucday Qaanuunka Guri Siinta Cadaaladda leh. Waa falka, iyadoo faa'idada lacagta la eegaayo, lagu saaraayo culeys mise la isugu da'aayo in culeys lagu saaro qofka inuu gurigiisa iibiiyo maadaamo ay dad koox gaar loo ilaalinaayo ay kusoo guuri doonaan xaafadaasi. Qofkii oon codsanin in guriga loo iibiyo haduu helo codsiyo tani cadayn ayee u noqon kartaa ficilkan.